TILMAAME DUGSIGA CARRUURTAADAA



Buug-gacmeedka
Waalidka
Dugsiyada Boise

Waxa soosaaray:
Degmo Dugsiyeedka Boise, Barnaamijyada Dawladda Dhexe ee, Idaho

Waxa maalgashay:
Waaxda Waxbarashada Gobolka Idaho iyo Xafiiska Dib-U-dejinta Qaxootiga

MAHADNAQYO

Tilmaame Dugsiga Carruurtaada: Buugga Waalidku waa wax soosaarkii iskaashiga dhawr wakaaladood oo kuyaal gobolka Idaho. Dadka kamasuulka ah diyaarinta iyo qaybinta buug-gacmeedkan waxa kujira:

Mike Stoy	La-taliye Qaxootiga oo Hore Waaxda Waxbarashada Gobolka Idaho
Dr. Ann Farris	Kormeere Barnaamijyada Dawladda Dhexe Degmo Dugsiyeedka Boise
Molly Jo de Fuentealba, M.Ed	La-taliye Barnaamijyada Dawladda Dhexe Degmo Dugsiyeedka Boise

Mahadnaq gaar ah waxa leh Dr. Edwin Silverman iyo Xarunta Kharaadka Waxbarashada Dadka Waaweyn ee Illinois deeqsinimadooda noo saamaxay inaan ka soo qaadano xog *Tilmaamaha Dugsiyada Illinois ee Waalidka Ardayda LEP*.

Xogaha qaar waxa sidoo kale laga soo qaaday *Waalidka Rafiiqyo Waxbarasho ahaan: Manhajka La-xidhiidha Dugisiga ee Luuqadda Waalidka Tirada Yar ee ay qoreen* Bercovitz iyo Catherine Porter, © Xarunta Khayraadka Waxbarashada Dadka Waaweyn.

WAX KUSAABSAN BUUG-GACMEEDKAN

Gacaliye Waalid ama Wakiil:

Soo Dhawaw. Buug-gacmeedkani wuxuu kusiin doonaa macluumaad muhiim ah oo kusaabsan nidaamka dugsiga ee Maraykanka iyo Idaho. Haddii adigu ama qoyskaagu ku cusub yahay waddankan ama gobolkan, waxa sax ah inaad qabto su'aalo kusaabsan dugsiyada. Macluumaadka buug-gacmeedkani Waa caam. Ka eeg Cutubka X tafaasiil badan oo gaar ah oo kusaabsan carruurta degmadaada.

Waalidka iyo dugsiyadu waa rafiiqyo waxbarashada carruurta. Labaduba waxay rabaan carruurtu inay guulaystaan. Marka waalidka iyo qoysku ku lug yeeshaan waxbarashada, carruurtoodu way fiicnaadaan dugsiyada waxana kubeerma inay aad u guulaystaan. Fahmidda sida nidaamka dugsiyada Maraykanku u shaqeeyo, waxay caawin kartaa in carruurtaadu guulaystaan waxa ugu wanaagsan ee ay karaana sameeyaan.

JADWALKA TUSMOOYINKS

SU'AALO IYO JAWAABO

I. NIDAAMKA DUGSIYADA MARAYKANKA

1. Siday u abaabulan yihiin dugsiyadu magaaladayda?..... 6
2. Waa maxay noocyada dugsiyada Maraykanka ka jiraa..... 7
3. Ma jiraan dugsiyo ardayda aan dhammaysan dugsiga sare?..... 9

II. ISQORISTA DUGSIGA

1. Sideen u qori karaa carruurtayda dugsiga? Waa maxay waraaqaha aan u baahanahay?.. 10
2. Qaabab caafimaad iyo baadhitaanadeebay carruurtaydu u baahan tahay kahor inta ayna bilaabin dugsiga? 10
3. Ka waran haddii tallaaladan carruurtaydu kusoo qaateen waddankayaga ama gobol kale? 11
4. Waa maxay baadhitaanada kale ee carruurtaydu u baahan tahay?..... 11
5. Halkeen u doonan karnaa baadhitaan jidheed?..... 11

III. JADWALKA DUGSIGA IYO MAALINTA DUGSIYEEDKA

1. Intay joogayaan carruurtaydu dugsiga maalin kasta?..... 12
2. Ma jiraan ciido ama maalmo gaar ah oo aanay ardaydu dugsiga tagayn?..... 12

IV. DUGSI AADIDDA

1. Sidee bay carruurtaydu u tagi karaan ugana iman karaan dugsiga maalin kasta?..... 14

V. HAB-RAACYADA DUGSIGA

1. Maxay tahay inaan sameeyo haddii ilmahaygu buko?..... 15
2. Bal kawaran hadday khasab tahay ilmahaygu inuu ku qaato daawo dugsiga?..... 15
3. Yey tahay inaan Waco haddaan qabo su'aalo kusaabsan caafimaadka ilmahayga?.... 16
4. Sidee buu dugsigu iila soo xidhiidhi karaa haddii ilmahaygu dugsiga ku bukoodo ama shil galo?.... 17
5. Haddii ay khasab tahay in ilmahaygu dib uga dhaco ama ka habsaamo dugsiga, maxaan sameeyaa?..... 18
6. Ma booqan karaa dugsiga ilmahayga?..... 19
7. Ma waxay tahay inaan lacag ka bixiyo wax kasta oo dugsiga ah?..... 19
8. Ayaan wax ka waydiin karaa hab-raaca dugsiga haddaan su'aalo qabo?..... 20

VI. DADKA KA SHAQEEYO DUGSIGA

1. Waa ayo dadka ka shaqeeya xafiisyada degmo dugsiyeedka iyo dugsiyada?…… 21
2. Waa ayo dadka ka shaqeeya xafiisyada degmo dugsiyeedka iyo dugsiyada?……. 23

VII. BARNAAMIJYADA WAXBARISEED

1. Haddii carruurtaydy aanay Ingiriisiga si fiican ugu hadal, maxay dugsiyadu u samayn karaan si ay u caawiyaan?.... .....…..... 24
2. Waa maxay maadooyinka carruurtaydu ku baranayaan dugsiga hoose?..... 24
3. Waa maxay maadooyinka carruurtaydu ku baranayaan dugsiga dhexe ama Dugsiga sare ee hore?…..... 24
4. Waa maxay maadooyinka carruurtaydu ku baranayaan dugsiga sare?..... 25
5. Haddii ilmahaygu qabo dhibaatooyin waxbarasho ama baahiyo gaar ah, maxay dugsiyadu u qaban karaan si ay u caawiyaan?..... 26
6. Ma jiraan barnaamijyo gaar ah haddii ilmahaygu leeyahay hibo ama awoodo gaar ah?... 26

VIII. DOORKA WAALIDKA EE WAXBARASHADA ILMAHOOGA

1. Sideen wax uga ogaan karaa dugsiga ilmahyga? Ilmahaygu ma arday fiican baa?... 27
2. Sideen ku ogaan karaa sida carruurtaydu ku yihiin dugsiga?.....……..... 28
3. Sideen u caawin karaa go'aan qaadashada kusaabsan dugsiga?.....…..……... 29
4. Waa maxay hawlaha gaarka ah ee aan xaadiri karo dugsiga carruurtayda?.....……. 30
5. Waa maxay qaababka qaar aan iskaa wax ugu qaban karo dugsiga carruurtayda?....….... 31
6. Maxaan guriga qaban karaa si aan u caawiyo waxbarashada carruurtayda?..... …. 32
7. Maxaan samayn karaa si aan u caawiyo qorshaha carruurtayda ee noloshooda dugsiga sare kadib?...…….. 37

IX. WAXBARASHADA DADKA WAAWEYN

1. Halkeen aadi karaa si aan u barto Ingiriisiga ama u qaato xiisado kale?..... .....…….. 36

X. DUGSIYADA BOISE

1. Sideen u qoraa ilmahayga?.....…. 39
2. Dugsigeebuu ilmahaygu tagi doonaa?…..…. 39
3. Barnaamijyadeebuu u hayaa Bois ardayga dugsiga sare ee hore iyo kuwa dugsiga sare?.... .....…. 39
4. Sideebuu ilmahaygu u iman doonaa dugsiga?..... 40
5. Maxaa ay tahay inaan lacag ka bixiyo dugsiga?.....…… 41
6. Ilmahayga dib ma uga dhici karaa ama ka maqnaan karaa dugsiga?..... 43
7. Ardaygaygy ma ka tagi karaa dugsiga maalinimada?.....…… 43

8. Maxaa ka mamnuuca dugsiga?.....…….. 44
9. Maxaa ku dhici doona ardayga keena dugsiga hub?.....……..…… 44
10. Halkeen ka heli karaa macluumaad kale oo kusaabsan Degmo Dugsiyeedka Boise? 44
11. Halkeen ka heli karaa macluumaadka Barnaamijka Bartaha Luuqadda Ingiriisiga?..... ... 45

I. NIDAAMKA DUGSIGA MARAYKANKA

Idaho, dhammaan carruurta da'da 7 ilaa 16 waa inay dugsiga aadaan. Sannad dugsiyeedku wuxuu bilaabmaa dabayaaqada Ogosto ama horraanta Sibtambar waxaanu dhammaadaa Juun. Waxa jira qiyaastii saddex bilood oo fasax xagaa ah Juun, Julaay iyo Ogosto.



Maraykanka waxa kajira dugsiyo dadwayne iyo kuwa gaar ah. Dugsiyada dadwaynuhu waa bilaash kuwa gaarka ahina waxay qaadaan lacag la dhaho lacagta waxbarista. Lacagta la siiyo dugsiyada dadwaynuhu waxay ka timaad cashuurta guryaha ee bulshadaada. Haddaad gurigaaga leedahay, qayb kamida cashuurta gurigaagu waxay caawisaa lacag bixinta dugsiyada dadwaynaha. Haddaad kiraysato abaarment, mulkiilaha dhismaha ayaa bixiya cashuurta guriga. Mulkiilaha dhismuhu wuxuu u isticmaalaa qayb kamida kiradaada cashuurahan. Dawladdu waxay sidoo kale ku caawisaa lacag bixinta dugsiyada dadwaynaha lacago kale.

1. Siday dugsiyadu u abaabulan yihiin magaaladayda?

Degmo Dugsiyeedka iyo Guddiyada Dugsiga

Maraykanka, dugsiyada dadwaynaha waxa loo qaybiyaa degmooyin. Degmo dugsiyeedada qaar waxay kuyaalaan hal magaalo, laakiin degmooyinka kale waxay kuyaalaan hal magaalo wax kabadan.

Degmo dugsiyeed kastaa waxay leedahay guddi dugsi. Xubnaha guddida dugsigu waxay kunool yihiin degmo dugsiyeedkooda. Guddida dugsigu waxay qaataan go'aanada dugsiyada degmada. Tusaale, guddida dugsigu waxay go'aansadaan haddii degmadu u baahan tahay in loo dhiso dugsi cusub. Guddida dugsigu sidoo kale waxay doortaan maamule guud. Maamuluhu waa agaasimaha degmo dugsiyeedka.

2. Waa maxay noocyada dugsiyada kajira Maraykanka?

Waxa jira dhawr nooc oo dugsiyo ah Maraykanka.

Dugsi horraad (da'aha3 ama 4): Carruurta qaar waxay aadaan dugsi horraad. Dugsi horraadka, carruurtu waxay la ciyaaraan carruurta kale waxay hore u bartaan xirfadaha xisaabta iyo akhrinta. Carruurtu waxay yimaadaan saacado yar maalintii 2, 3 ama 3 cisho toddobaadkii. Dugsi kastaba ma laha dugsi horraad. Dugsi horraadada qaar waa bilaash kuwa kalena lacag waxbaris ayey qaadaan.

Dugsiga Barbaarinta (da'da 5): haddii carruurtaadu ay tahay 5 jir ama kawayn kahor Sibtambar 1, waxay aadi karaan dusiga barbaarinta. Carruurtu ma aha inay aadaan dugsiga barbaarinta, laakiin carruurta badankoodu way aadaan. Waxay aadaan dugsiga barbaarinta Isniinta ilaa Jimcaha. Xiisadaha dugsiga barbaarinta badankoodu waa maalin badhkeed, qaarna waa maalinta oo dhan.

Fasalada 1 – 9 (Hoose/Dhexe/7 iyo 8aad): Sannado dugsiyeedka Maraykanka waxa la dhahaa "grades". Carruurtu waxay joogaan dugsiga 5-1/2 - 7 saacadood maalintii Isniinta ilaa Jimcaha. Carruurta yaryar inta badan waxay joogaan hal fasal waxayna leeyihiin hal macalin sannadka oo idil. carruurta waaweyni waxay badanka leeyihiin 6 ilaa 8 fasal oo kala duwan maalintii. Waxa dhici karta inay beddelaan qolal kala duwan waxana dhici karta inay helaan macalin gaar ah xiisad kasta. Dugsiyada carruurta fasalada 5 ama 6 ilaa 8 waxa la dhahaa Dugsiyada Dhexe ama fasalada dugsiga sare ee hore.

fasalada 10 – 12 (Dugsiga Sare): Carruurtu inta badan waxay galaan dugsiga sare da'da 15 waxayna ka qalin-jabiyaan da'da 18. Ardayda dugsiga sare waxay beddelaan fasalada waxayna leeyihiin macalimiin kala duwan maalintii. Waxay kasbadaan dhibco fasal kasta, kaasoo looga baahan yahay qalin-jabinta. Dugsiga sare wuxuu u diyaariyaa ardayda shaqo ama daraasado kolaj bulsho ama jaamacad.

Kahor iyo Kadib Barnaamijyada Dugsiga: Dugsiyada qaar waxay leeyihiin barnaamijyo daryeel ilme kahor dugsiga. Dugsiyadan, waalidku waxay keeni karaan carruurtooda dugsiga kahor inta aanu dugsigu furmin. Dugsiyada qaar waxay sidoo kale leeyihiin barnaamijyo carruurta ah kadib dugsiga. Dugsiyadan, carruurtu waxay isqori karaan barnaamij dugsiga kadib oo ah muusiga, ciyaaraha, caawimada shaqada guriga, ama hawlo kale. dugsiyada qaar waxay qaadaan lacag barnaamijyadan.

Waa inaad qortaa carruurtaada barnaamijyada gaarka ah ood bixisaa oggolaanshahaaga oo qoran kahor inta carruurtaadu aanay iman xilli hore ama joogin xilli dambe dugsiga.

Dugsiga Xagaaga: Dugsiyo badan oo hoose iyo sare waxay bixiyaan dugsi xagaa. Fasalada xagaaga qaar waxa loogu talogalay ardayda u baahan caawimo dheeraad ah dugsiga. Fasalada qaar waxa loogu talogalay hawlo iyo mawduucyo gaar ah, sida xiisado kombiyuutar ama fasalo ay kujiraan Barteyaasha Luuqadda Ingiriisiga. Waxa la qaadi karaa lacag dugsiga xagaaga.

Kadib Dugsiga Sare: Ardayda kaqalin-jabisa dugsiga sare waxay dooran inay shaqo tagaan ama kubiiraan milatariga. Waxay sidoo kale kasii wadan karaan waxbarashada dugsiyada xirfadda, kolajyada bulshada, ama 4 sano oo kolaj ama jaamacad ah.



Waxa kajira kolajyo ama jaamacado 4 sano ah oo gaar ah ama dadwaynuhu leeyahay Maraykanka. Jaamacadaha iyo kolajyada gaarka ah iyo kuwa dadweynuhuba aad ayey u qaali noqon karaan. Ardaydu waxay codsan karaan deeqo waxbarasho iyo daymo si ay isaga bixiyaan waxbarashadooda. Qaar dadka yaryar kamida waxay kubiiraan milatariga si ay u helaan waxbarasho bilaash ah.

Kolajyada bulshadu waa dugsiyo dadwayne oo 2 sano ah oo ay ay maalgaliyaan cashuurta guryaha iyo dawladdu. Way kajaban yihiin jaamacadaha gaarka ah ama kuwa dadwaynaha. Kadib xaadirista kolajka bulshada 2 sano, ardaydu waxay heli karaan shahaadada Associate of Arts ama u gudbi doonaan jaamacad 4 sano si ay u sii wadaan waxbarashadooda.

3. Ma jiraan dugsiyo ardayda aan dhammaysan dugsiga sare?

Carruurtu waa inay xaadiraan fasalada 1-12 si ay uga qalin-jabiyaan dugsiga sare. Aad ayey muhiim u tahay inay kaqalin-jabiyaan dugsiga sare. Jaamacaha iyo loo-shaqeeyayaasha badankoodu waxay u baahan yihiin dibloomada dugsiga sare. Laakiin ardayda qaar waxay ka tagaan dugsiga sare iyagoon qalin-jabin. Way kabaxaan dugsiga. Waxa jira barnaamijyo kala duwan oo loogu talogalay ardaydan:

Xiisadaha Fiidka: Dugsiyada sare qaarkood waxay leeyihiin xiisado fiidkii ah oo loogu talogalay ardayda ka taga waxbarashada.

Dugsi Sare oo Beddel ah: Degmooyinka qaar waxay leeyihiin dugsiyo sare oo beddel ah. Waxa jira inta badan dugsiyo yaryar dhismeyaal kala duwan oon aan lamid ahayn dugsiga sare ee caadiga ah.

Xiisadaha GED: Waxa jira xiisado maalmeed iyo fiideed si looga caawiyo dadka waaweyn inay gudbaan imtixaanka Horumarinta Waxbarasheed ee Caamka ah (GED). Dadka waaweyni waxay isticmaali karaan dibloomada GED oo kale ah ee dugsiga sare. Jaamacadaha iyo loo-shaqeeyayaasha badankoodu way aqbalaan GED. Laamaha deegaanka ee maktabadaha dadwaynaha inta badan waxay leeyihiin macluumaad kusaabsan xiisadaha GED.

Qoraalo Dheeraad ah

II. DUGSI QORISTA

1. Sideen u qori karaa carruurtayda dugsi? Waa maxay waraaqaha aan u baahanahay?

Waraaqaha aad uga baahan karto qorista:

- Caddaynta taariikhda dhalashada hadday jirto (shahaadaada dhalashada ilmaha, I-94, ama baasaboorka ilmaha)
- Lambarka Sooshiyal Sekuyuurati hadduu jiro
- Dokumentiyada Caafimaadka: Diiwaanada Tallaalada
- Caddaynta ciwaanka: (qaansheegta dabka/biyaha, heshiiska abaarmenka, liisanka baabuurka Idaho oo shaqaynaya, ama dhaar nootaayeyesan (bayaanka dhaarta) ee deggenida
- Qoraalada dugsi hore hadduu jiro. Tusaale, waalidku waxay hayn karaan diiwaanada dugsiyo Maraykan oo kale ama dugsiyo waddamadoodii ah.

Waydiiso dugsiga liiska waraaqaha si aad u keento qorista.

2. Foomam caafimaad iyo baadhitaanadee baa carruurtaydu u baahan tahay kahor inta aanay bilaabin dugsiga?

Marka carruurtu dugsiga galaan, waa inay qaataan tallaalada socda. Haddii tallaalada aan la cusboonaysiin, loo oggolaan maayo inay yimaadaan xiisadaha marka dugsigu bilaabmo.

Tallaalada: Carruurta oo dhan waa inay ka tallaalan yihiin cudurro gaar ah. Macluumaad dheeraad ah, kala xidhiidh hawl-wadeenka kiiskaaga, kafiilka, ama kalkaalisada dugsiga.

Baadhitaanada jidheed: Kahor isqorista P.E. ama ciyaarta dugsiga dhexe ama sare, ardaygu waa inuu sidoo kale maraa baadhitaan jidheed. Dhakhtarku wuxuu buuxin doonaa foom caafimaad. Waxaad u baahan doontaa inaad dib ugu soo celiso foomka oo buuxsan dugsiga.

3. Bal kawaran haddii carruurtaydu kusoo qaateen tallaaladan waddankayagii ama gobol kale?

Haddii ilme kusoo qaatay qaar kamida tallaaladan waddan ama gobol kale, waalidku waa inuu tusiyaa diiwaan caafimaad dhakhtarka inta baadhista jidheed ee ilmaha. Dhakharku wuxuu samayn doonaa diiwaan tallaal oo Maraykan ah. Haddii aanu jirin diiwaan caafimaad ee tallaalada, waa in ilmuhu qaataa mudista mar kale.

4. Waa maxay baadhitaanada kale ee carruurtaydu u baahan tahay?

Dugsiyada hoose badankooda, carruurtu waxay helaan baadhitaano dhibaatooyinka aragga (isha) ama maqalka(dhegta) ah. Carruurta xidhata muraayado ma maraan baadhis arag. Haddii baadhistu muujiso dhib haysata aragga ama maqalka ilmaha, dugsigu wuxuu u diraa warqad waalidka ilmaha. Haddaad ka hesho warqad dugsiga, waa inaad markaas u qaadaa ilmahaaga dhakhtar ama rug caafimaad si loogu sameeyo baadhis buuxda.

5. Halkeen u tagi karnaa baadhis jidheed?

carruurtu waxay ku qaadan kartaa baadhis jidheed ama tallaalada xafiiska dhakhtarka ama rugta. Dugsiyada oo dhami waxay leeyihiin macluumaad kusaabsan baadhitaano ama tallaalo bilaasha ama jaban.

Qoraalo Dheeraad ah

III. JADWALKA DUGSIGA IYO MAALINTA DUGSIGA

1. Intay joogayaan carruurtaydu dugsiga maalintii?

Dugsiyada badankoodu waxay bilaabmaan dabayaaqada Ogosto ama Horraanta Sibtambar waxayna dhammaadaan toddobaadka hore ama labaad ee Juun. Maalinta dugsigu inta badan waa ilaa 5-1/2 – 7 saacadood. Ardaydu inta badan waxay ka qadeeyaan dugsiga. Carruurta qaar waxay keensadaan qado dugsiga. Ardaydu waxay sidoo kale ka iibsan karaan qadadooda dugsiga.

2. Ma jiraan ciido ama maalmo gaar ah oo ardaydu aanay iman dugsiga?

Maalinta Shaqaalah.....	Isniinkta 1aad ee Sibtambar
Shukhrinaq.....	Khamiista 4aad ee Noofambar
Kirismaska.....	25ka Diisambar
Sannadka Cusub.....	Jeeniwari 1
Maalinta Martin Luther King.....	3rd Isniinta 3aad Jeeniwari
Maalinta Madaxwaynaha.....	Isniin 3da Feebarwari
Maalinta Askarta Dagaal ku dhimatay.....	Isniin 4ta Meey

Dugsiyadu way xidhan yihiin maalmaha kale sidoo kale. dugsiyadu waxay samaystaan qaar kamida ciidaha ay iska leeyhiin. Waxa jira kulano gaar ah ee macalimiinta Maalinta Machadka. Marmarka qaar ma jiro dugsi maalmaha tabobarka shaqaalaha dugsiga, wakhtiyada kalena carruurtu waxay hooydaan xilli hore. Marka carruurtu hoyato xilli hore, waxa la dhaha hore u fasaxid. Jadwalka dugsigu wuxuu taxaa marka carruurtu guriga joogaan iyadooy ugu wacan tahay tabobarka shaqaalaha dugsiga, ciido, fasaxyo, ama hore loo fasaxayo. Haddii ilmahaagu u baahan yahay inuu guriga joogo ciid diineed iyadoo dugsigu aanu xidhnayn, wac dugsiga si aad u sheegto maqnaanshaha ilmahaaga.

Xidhnaanshaha Dugsiga: Sometimes schools close when the weather is very bad. For example, if there is a lot of snow outside or there is a tornado, the school may close. You can listen to the radio or watch the television news in the morning to see if your children's schools are closed.

TUSMOOYIN FAA'IDO

Waydiiso jadwalka dugsiga markaad ilmahayga qorayso.

Qoraalo Dheeraad ah

IV. DUGSI AADIDDA

1. Siday carruurtu u aadi karaan ugana soo noqon karaan dugsiga cisho kasta?

Carruurtu u dhaw dugsigu inta badan way u soo lugeeyaan dugsiga. Carruurta kafog dugsigu inta badan waxay soo fuulaan baska dugsiga ama gaadiidka dadwaynaha. Basaska dugsigu waa bilaash. Haddii ilmahaagu raaco baska dugsiga, waxaad u baahan tahay inaad ogaato:

- Lambarka baska dugsiga
- Halka ilmahaagu baska ka raaco
- Wakhtiga ilmahaagu baska fuulo
- Halka ilmahaagu baska kaga dego
- Wakhtiga ilmahaagu baska ka dego



Lambarka Baska	
Goobta ka Qaadista	
Wakhtiga Qaadista	
Lambarka Baska	
Goobta Dhigista	
Wakhtiga Dhigista	

V. HAB-RAACYADA DUGSIGA

1. Maxaan sameeyaa haddii ilmaygu buko?

Haddii carruurtaadu bukto, waa inay joogaan guriga. Marmarka qaar waalidku waxay u soo diraan ilme buka dugsiga sababtoo ah way shaqo tagayaan oo lama joogi karaan ilmaha guriga. Laakiin ilmaha buka wuxuu qaadsiiyaa xanuunka carruurta kale. Dugsiyada badankoodu ma rabaan waalidku inuu u soo diro dugsiga ilmaha haddii:



- ilmuhu leeyahay xummad ah 100° F (37.7° C) ama ka saraysa
- ilmuhu matagay xalay ama arroornimadii dugsiga kahor
- ilmuhu aad u qufacayo
- ilmuhu leeyahay finan maqaar ama naburro
- ilmuhu injir leeyahay (Waalidku waa inay ku maydhaan timaha ilmaha shaamboo gaar ah oo ka sifeeyaan qindhicilka injirta timaha ilmaha. Tan kadib, ilmuhu wuu kusoo noqon karaa dugsiga.)
- ilmuhu qabo hablobaas (Ilmuhu waa inuu guriga jooga 7 cisho kadib marka hablobaastu bilaabanto.)
- ilmhu qabo cuno xanuun (Ilmuhu wuxuu kusoo laaban karaa dugsiga kadib qaadashada antibaayootik 24-48 saacadood.)
- ilmuhu qabo xummadda scarlet (Ilmuhu wuxuu kusoo laaban karaa dugsiga kadib qaadashada antibaayootik 24-48 saacadood.)
- ilmuhu qabo indho xanuun (pinkeye)

Dugsiyadu inta badan warqad ayey u diraan waalidka haddii arday kujira fasalka ilmahoogu uu qabo cudur taabashada la isku qaadsiiyo sida hablobaas, cuno xanuun, xummadda scarlet, ama injir. Warqaddani waxay kuu sheegi doontaa waxa la raadiyo si aad u ogaato haddii ilmaagu qaaday cudurka.

2. Kawaran hadday khasab tahay ilmahaygu inuu kuqaato daawo dugsiga?

Waalidku waa inayna carruurta dugsiga daawo ugu dirin ilaa aad iyo aad lama huraan u noqoto. Carruurta looma oggola inay daawo ku qaataan dugsiga kaligood. Hadday lama huraan noqoto in ilme ku qaato daawo dugsiga, waalidku waa inuu qoraal qoraal gaaban uu ku sharxayo xaaladda una dhiibaa xoghaynta dugsiga. Ilmuhu waa inuu la yimaadaa daawada xafiiska hore. Dugsiyada qaar waxay u baahan karaan qoraalka dhakharka.

Waalidku waa inay u diraan dugsiga daawo kujirta dhaladii farmasigii hore, oon kujirin boors ama gal-waraaqeed. Dhaladu waa leedahay summad leh:

- magaca ilmaha
- magaca dhakhtarka
- magaca daawada
- inta iyo wakhtiga la siinayo daawada

ilmuhu waa inuu yimaadaa xafiiska hore si uu u qaato daawada

3. Ayaan wacaa haddaan qabo su'aalo kusaabsan caafimaadka ilmahayga?

Haddaad qabto su'aalo kusaabsan caafimaadka ilmahaaga marka dugsiga, wac xoghayaha dugsiga ama la-taliyaha. Haddaad sheegayso maqnaansho, wac xoghayaha dugsiga.

Qoraal Dheeraad ah

4. Siduu dugsigu ii heli karaa haddii ilmahaygu xanuunsado ama shil galo?

Haddii ilmahaagu ku xanuunsado ama shil ku galo dugsiga, dugsigu wuxuu soo wici doonaa adiga ama qofka ku qoran Kaadhadhka Xaaladda Gurmadka ah.

Macluumaadka Xaaladda Gurmadka ah: Dugsigu wuxuu kusiin doonaa foomkan marka aad qorto ilmahaaga dugsiga. Kaadhka Xaaladda Gurmadka, ku qor magaca iyo lambarka tilifoonka qofka la wacayo haddii ilmahaagu ku xanuunsado ama shil ku galo dugsiga. Aad ayey muhiim u tahay inaad buuxiso kaadhka xaaladda gurmadka ah ee ilme kasta dibna ugu soo dirto dugsiga.

Waa muhiim inaad qorto:

- lambarka tilifoonka meesha aad joogto maalintii
- magaca iyo lambarka tilifoonka qaraabo ama saaxiib dhaw kuwaasoo fahmaya Ingiriisiga
- magaca iyo lambarka tilifoonka dhakhtarka ama rugta ilmahaaga
- wixii baahiyo caafimaad oo gaar ah ee ilmahaagu qaboany

Lambarkaaga Tilifoonka maalintii	☎
Magaca & Tilifoonka Saaxiibka	☎
Magaca & Tilifoonka Dhakhtarka/Rugta	☎
Baahiya gaarka ee ilmahayga:	

Haddii macluumaadkani isbeddelo xilli kasta, la xidhiidh dugsiga oo buuxi Kaadh Xaalad Gurmad oo cusub.

Guurista: haddaad u guurto abaarmen ama guri kale, waa inaad la xidhiidhaa dugsiga ood siisaa ciwaanka iyo tilifoonka cusub. Sidoo kale waa inaad buuxisaa Kaadhka Xaaladda Gurmadka.

5. Hadday khasab tahay ilmahaygu inuu dib dhaco ama ka habsaamo dugsiga, maxaan sameeyaa?

Dib Uga Dhaca Dugsiga: Carruurtu waa inayna dib uga dhici dugsiga. Carruurtu waa inay ku yimaadaan dugsiga wakhti. Haddii carruurtu dib dhacdo, macalinku wuxuu ku qori dib dhac ama daah. Waa inaad wacdaa dugsiga subaxdii haddii ilmahaagu dib uga dhacayo dugsiga. Ama waxaad ugu dhiibi kartaa ilmahaaga qoraal dugsiga.

Ka Maqnaanshaha Dugsiga: Marka ilmahaagu aanu iman karayn dugsiga, wac dugsiga maalin kasta subaxdii kahor inta dugsigu aanu bilaabmin. Dugsiyada qaar waxay leeyihiin mishiin jawaaba. Waalidku waxay kaga tagi karaan farriin mishiinka jawaaba ee dugsiga.

Markaad wacdo dugsiga, waa inaad siisaa macluumaadkan soo socda:

- magaca ilmahaaga
- fasalka iyo macalinka ilmahaaga
- sababta ilmahaagu la maqnaanayo
- magacaaga iyo lambarka tilifoonkaaga

marmarka qaar waalidku waxay ka qaadaan carruurtooda dugsiga maalintii kahor inta aanu dugsigu dhammaan. Waxa dhici karta inay carruurtooda gaynayaan dhakhtar ama dhakhtarka ilkaha maalinnimada. Haddaan rabto inaad ka qaado ilmahaaga dugsiga, waa inaad u qortaa qoraal macalinka. Ilmahaagu waa inuu u geeyaa qoraalka macalinka arroornimada. Qoraalku waa inuu sheegaa:

- sababta aad uga qaadayso ilmahaaga dugsiga
- wakhtiga aad ka qaadi doonto ilmahaaga dugsiga
- magaca qofka qaadaya ilmahaaga haddaanu ahayn waalid ama wakiil

markaad dugsiga aado si aad u soo qaado ilmahaaga, tag xafiiska oo waydiiso ilmahaaga. Dugsigu wuxuu ku waydiinsan doonaa inaad saxeexdo warqad si ilmahaagu u bixi karo.

Fasaxyada Qoyska: Waalidku waa inayna u qaadin carruurtooda fasaxyada xilliga dugsiga. Waalidku waa inay qaataan fasaxyada qoyska xilliga fasaxyada dugsiga. Hadday khasab tahay inaad qaadato fasaxaaga xilliga dugsiga, waa inaad la hadashaa macalinka ilmahaaga kahor intaanad tagin.

Shaqada Soo Buuxinta: Carruurta ka maqnaata dugsiga waa inay qabtaan shaqada dugsiga ee ay seegeen. Haddii ilmuhu ka maqnaado dugsiga wax kabadan 2 cisho, dugsiyada badankoodu waxay ka doonaan waalidku inuu soo Waco dugsiga si uu u helo shaqada soo buuxinta. Adiga iyo saaxiibka ilmahaagu waxaad aadi kartaan fasalka ilmaha si aad u heshaan shaqada soo buuxinta.

6. Ma booqan karaa dugsiga ilmahayga?

Booqashada Dugsiga: Waalid waa lagu soo dhawaynayaa dugsiga carruurtooda. Markaad booqato dugsiga, waa inaad u tagtaa xafiiska gudbidda booqdaha. Waad booqan kartaa fasalka carruurtaada, laakiin kalama hadli kartid macalinka ilmahaaga xilliga xiisadda. Haddii waalidku rabo inuu la hadlo macalinka, waa inay ballan sii qabsadaan.

7. Miyey tahay inaan lacag ka bixiyo wax kasta oo dugsiga ah?

Waxa jira lacag laga qaado hawlaha ama ashyaada qaar ee dugsiga:

Lacagta Buugga: Waxa jira lacag laga qaado buugaagta qoran qaarkood. Haddii lacagta buuggu aad qaali ugu tahay qoysku inuu bixiyo, waalidku waxay kala hadli karaan dugsiga ka dhimis ama ka dhaafis lacageed. Ilmahaagu waa inuu si fiican u ilaaliyaa buugaagta. Dhammaadka sannad dugsiyeedka, ilmahaagu waa inuu kusoo celiyaa buugaagtii oo dhan dugsiga.

Hawlaha dheeraadka ah: Marmarka qaar waxa jira lacag la qaado hawlaha dheeraadka ah sida ciyaaraha, casharada muusiga, kooxaha waxbarasho ama bulsheed. Qaar badani oo kamida hawlahani waxay kahorreeyaan ama kadambeeyaan dugsiga.

Socdaalada takhasuska: Marmarka qaar ardaydu waxay ugu kacaan socdaalo takhasus goobaha madadaadalada, beeraha xayaanka, iyo meelo kale. Waalidku waa inuu saxeexaa foom oggolaansho kahor inta ilmuhu aanu tagin socdaalka takhasuska. Marmarka qaar waxa jira lacag yar si ay u caawiso lacag iska bixinta socdaalka takhasuska. Marmarka qaar waxa la siiyaa waalidku fursad si ay iskaa wax ugu qabtaan socdaalka takhasuska si ay uga caawiyaan macalinku inuu ka warhayo carruurta marka safarka.

Qadooyinka: Haddii carruurtu aanay u soo qaadan qadadooda dugsiga, inta badan waxay iibsan karaan qadada dugsiga. Dugsiyada intooda badan waxay leeyihiin barnaamij qado oo bilaash ah ama jaban oo loogu talogalay waalidka aan awoodin inay iska bixiyaan. Waalidku waa inay buuxiyaan foom kusaabsan dakhliga qoyskooda si ay u arkaan in ilmahoogu heli karo qado bilaasha ah ama jaban.

8. **Ayaan wax ka waydiin karaa hab-raacyada dugsiga haddaan su'aalo qabo?**

Waxaad wici kartaa macalinka ilmahaaga haddaad qabto su'aalo kusaabsan hab-raacyada dugsiga.

Qoraalo Dheeraad ah

VI. DADKA KA SHAQEEYA DUGSIGA

1. Waa ayo dadka ka shaqeeya xafiisyada degmo dugsiyeedka iyo dugsiyada?

Shaqaalaha dugsigy waa dadka ka shaqeeya dugsiga. Waxa jira saddex nooc oo shaqaalaha dugsiga ah: maamuleyaasha, macalimiinta, iyo shaqaalaha taageerada.

Maamuleyaasha wax ma baraan ardayda. Waxay maamulaan dugsiyada iyo barnaamijyada. Waxa jira saddex nooc oo maamuleyaal ah:

Maamule Guud:	Maamulaha guud waa maamulaha degmo dugsiyeedka.
Maamule:	Dugsi kasta oo degmada ku yaal wuxuu leeyahay maamule kaas oo ah maamulaha dugsiga.
Maamule Ku-xigeen:	Marmarka qaar dugsiyadu waxay leeyihiin maamule ku-xigeen si uu u caawiyo maamulaha.
Xafiiska Dhexe:	Maamulka degmada ee qaata go'aanada degmada oo dhan.

macalimiintu waxay wax baraan ardayda dugsiga. Waxa jira noocyo badan oo macalimiin ah:

- *Macalinka Fasalka:* Barbaarinta ilaa fasalada 5^{aad} ama 6^{aad}, ardaydu badanka waxay la joogaan macalinka fasalkooda maalintii. Macalinka fasalku badanka wuxuu baraa xiisado badan sida akhrinta, xisaabta, iyo sayniska.

- *Hool/Macalin Kooxeed:* Ardayda ugsiga dhexe, labada fasal ee sare ee dugsiga dhexe, iyo dugsiga sare waxay leeyihiin macalin hool. Marmarka qaar waxay kaqaybqaataan hawlaha kooxda oo la dhahaa talo-bixiye. Xilliga hoolka, ardaydu waxay maqlaan ogaysiisyo waxay ka helaan macluumaad maalin dugsiyeedka.

- *Macalinka Bartaha Luuqadda Ingiriisiga (ELL):* Macalinka ELL wuxuu baraa Ingiriisiga ardayda u baahan barashada akhrinta, qorista, iyo ku hadalka Ingiriisiga.

- *Macalinka Waxbarashada Gaarka ah:* Macalinka waxbarashada gaarka ahi wuxuu wax baraa ardayda baahi gaarka ah leh. Ardaydani waa inay u qalmaan iyagoo sii maraya kulan la dhaho "IEP" (Individualized Education Plan).

- *Macalinka Hibada leh:* Macalinka hibada leh wuxuu wax baraa fasalada ardayda keena imtixaanka dhibco aad u sarreeya iyo/ama ardayda garaadka cajiibka ah.

- *Macalinka Muusiga:* Macalinka muusigu wuxuu baraa hab-dhaca, heesidda iyo sida loo tumo qalabka muusiga.

- *Macalinka Farshaxanka:* Macalinka farshaxanku wuxuu baraa midabaynta, sawiridda, dhoobo qaabaynta, iyo farshaxano kale.

- *Macalinka Jimicsiga/Macalinka Waxbarashada Jidheed (PE):* Macalinka jimicsiga ama macalinka P.E. wuxuu baraa waxbarashada jidheed sida ciyaaraha iyo jimicsiyada.

- *Maktabad-hayaha:* Maktabad-hayuhu wuxuu u akhriyaa ardayda oo baraa wax kusaabsan maktabadda wuxuuna ka caawiyaa ardaydu inay amaahato buugaagta maktabadda.

- *Macalinka Hadalka:* Macalinka hadalku wuxuu caawiyaa ardayda uu ku adag yahay ku dhawaaqidda erayada iyo hadalku. Ardaydani waa inay u qalmaan iyagoo sii mara kulan "IEP" (Individual Educational Plan).

Shaqaalaha Taageeradu waxay ka caawiyaan maamuleyaasha iyo macalimiinta inay shaqadooda qabtaan. Qaar kamida shaqaalaha taageeradu waa:



- *Xoghayaha Dugsiga:* Xoghayuhu wuxuu ka jawaabaa tilifoonada, garaacaa waraaqaha iyo qoraalada, salaamaa booqdayaasha dugsiga, oo caawiyaa maamulaha.

- *Kalkaalisada Dugsiga:* Kalkaalisada dugsigu ama xoghayaha dugsigu wuxuu daryeelaa carruurta ku bukoota dugsiga.

- *Adeegaha Bulshada/La-taliye:* Adeegaha bulshada ama la-taliyuhu wuxuu ka caawiyaa ardayda dhibaatooyinka ay kala kulmaan dugsiga ama guriga. Adeegaha bulshadu wuxuu la shaqayn karaa ilmaha, waalidka ama qoyska oo idil. Dugsiga sare, la-taliyuhu wuxuu ka caawiyaa ardayda inay doortaan maadooyin wuxuuna siiyaa macluumaad kusaabsan kolajyada iyo shaqooyinka.

2. Ayaan kala hadli karaa ilmahayga dugsiga?

Dugsiga hoose, marka hore la hadal macalinka fasalka ama ELL ee ilmahaaga. Wuxuu kaa caawin doonaa ama kuu sheegi doonaa cidda ku caawin karta.

Dugsiga dhexe, labada fasal ee sare dugsiga dhexe ama kasare, waxaad wici kartaa macalinka hoolka ilmahaaga ama macalinka ELL marka hore.

Bilawga sannad dugsiyeedka, ku buuxi macluumaadka shaxankan wax kusaabsan carruurtaada:

Magaca Ilmaha	Magaca Dugsiga	Lambarka Tilifoonka Dugsiga	Fasalka	Magaca Macalinka
		☎		
		☎		
		☎		

Qoraalo Dheeraad ah

VII. BARNAAMIJYADA WAXBARSIEED

1. Haddii ilmahaygu aan Ingiriisiga si fiican ugu hadal, maxay dugsiyadu u qaban karaan si ay u caawiyaan?

Ardayda uu ku adag yahay ku hadalka ama akhrinta Ingiriisigu waxay ku qaadan karaan xiisado Ingiriisiga luuqadda labaad ahaan (ESL) dugsiga. Xiisadaha ESL waxay baraan ardayda inay ku hadlaan, akhriyaan oo qoraan Ingiriisiga. Waxay kale oo ay Ingiriisiga ku baraan iyada oo ay kujiraan sida taariikh iyo saynis.

Marka ardaydu ugu horray dugsigu la qoro, waxa laga qaadaa imtixaan Ingiriisi ah. Imtixaanku wuxuu ka caawiyaa ardayda inay galaan fasalka saxda ah. Ardayda barnaamijyada ELL waxa laga qaadaa imtixaan Ingiriisi ah sannad kasta. Ardaydu waxay qaataan xiisado ELL ah ilaa xirfadahooga Ingiriisigu fiicnaado.

2. Maadooyinkee ayey carruurtaydu ku bartaan dugsiga hoose?

Carruurtu waxay ku bartaan dugsiga manhajka degmada. Dugsiyada hoose, carruurtu waxay bartaan maadooyinka badan oo kala duwan:

- Akhrinta, barashada naxwaha, iyo xisaabta (maalin kasta)
- Caafimaadka, sayniska, cilmiga bulshada (2 ilaa 5 jeer toddobaadkii
- Farshaxanka, waxbarashada jidheed, muktabadda, muusiga (1 ama 2 jeer toddobaadkii)

3. Maadoonykee ayey carruurtaydu baranayaan dugsiga dhexe fasalada sare dugsiga dhexe?

Dugsiga dhexe ama fasalada sare dugsiga dhexe, carruurtu waxay ku beddelaan qolalka fasalo. Badanka waxay leeyihiin macalimiin kala duwan maalintii. Waxa kujiraan dhismaha maalinimadii mana bixi karaan. Xiisadaha ay dhigtaan waxa kujiri kara:

- Akhrinta & Naxwaha
- Waxbarashada Jidheed & Caafimaad
- Saynisyo
- Muusig
- Xisaab
- Kombuutaro

- Cilmiga Bulashada
- Luuqadaha Qalaad (tusaale, Isbaanishka & Faransiiskafor example)
- Farshaxanka

4. Waa maxay maadooyinka carruurtaydu bartaan dugsiga sare?

Ardayda dugsiga sare waxay dhigtaan koorsooyin loo baahan yahay oo xul ah. Koorsooyinka loo baahan yahay waa maadooyinka ardayda oo dhan khasab ku ah inay dhigtaan si ay u qalin-jabyaan. Tusaale, Ingiriisiga iyo xisaabtu waa koorsooyin loo baahan yahay.

Fasalada dugsiga sare qaarkood waxay leeyihiin adkaansho kala sarreeya. Tusaale, fasalka Ingiriisiga ah wuxuu noqon karaa aasaas, dhexdhexaad, mid sare ama fasalka sharafta. Halkan waxa ah qaar kamida xiisadaha kala duwan ee dugsiga sare:

- Ingiriisi
- Xisaab (Tusaale, aljabra ama joomatari)
- Saynisyo (Tusaale, bay'oolaji ama kimistari)
- Sayniska Qoyska & Quutaha
- Waxbarashada Jidheed/Jimicsi
- Sayniska Kombiyuutarka
- Tiknoolajiga la Dabbakho
- Ganacsi
- Cilmiga Bulshada
- Farshaxanka
- Luuqadda Qalaad
- Ingiriisiga Luuqadda Labaad ahaan (ESL o ELL)

TUSMOOYIN FAA'IDO LEH

U same gal dokumentiyada dugsiga oo dhan. badanka carruurtu waxay ugu keenaan guriga macluumaadka dugsiga waalidka boorsooyinkooga. galkani waxa kujiri kra macluumaad kusaabsan jadwalka dugsiga, wakhtiga baska, fasaxyada dugsiga, ciidaha, iyo xogaha kale iyo ogaysiisyada laga soo diro dugsiga .

Qoraalo Dheeraad ah

5. Haddii ilmahaygu leeyahay dhibaatooyin barasho ama baahiyo gaar ah, muxuu dugsigu u qaban karaa si uu u caawiyo?

Barashada gaarka ahi waa barnaamij loogu talogalay ardayda leh dhibaatooyin cayiman dugsiga. Ardaydani waxa qabi karaan dhibaatooyin arag, maqal, hadal, socod, barasho, ama habdhaqan fasalka dhexdiisa. Dugsiyadu waxay siiyaan adeegyado waxbarasho gaar ah ardaydan si ay uga caawiyaan inay guulaystaan dugsiga. Haddii ilmahaagu leeyahay baahiyo barasho oo gaar ah:

- Warso adeegyada kajira dugsiga ilmahaaga.
- U sheeg u dugsiga nooca caawimada gaarka ee ilmahaagu u baahan yahay dugsiga.
- Codso tarjumaan kulanka haddaanad ku hadal Ingiriisiga.
- Xafid dhammaan dokumentiyada iyo waraaqaha muhiimka ah ee shaqaalaha dugsigu ku siiyo ama kuu soo diro.

TUSMOOYIN FAA'IDO LEH

Waxaad ka heli kartaa buug yar oo kusaabsan xuquuqaha ardayda naafada ah Guddida Waxbarashada Gobolka Idaho. Wac DUGSIGAAGA oo codso nuqul kamida *Tilmaame Waalid: Xuquuqaha Waxbarasho ee Ardayda Naafada ah.*

6. Ma jiraan barnaamijyo gaar ah haddii ilmahaygu leeyahay hibo ama awoodo gaar ah?

Ardayda leh hibo ama awoodo gaar ah marmarka qaar waxa la dhahaa "Hibo leh". Ardaydani waxay marmarka qaar qaadan karaan fasalo gaar ah oo leh shaqo adayg iyo hal-abuur leh.

VIII. DOORKA WAALIDKA EE BARASHADA IYO WAXBARASHADA ILMAHOODA

Dugsiyadu waxay rabaan waalidku inuu ku lug yeesho waxbarashada ilmahooga. Waalidku wuxuu ugu lug yeelan karaa waxbarashada ilmahooda siyaabo badan. Waxay:

- la hadli karaan maamuleyaasha iyo macalimiinta
- xaadiri karaan hawlaha dugsiga
- caawin karaan go'aan qaadashada dugsiga
- iskaa wax ugu qaban karaan dugsiga

1. Sideen wax uga ogaan karaa dugsiga ilmahayga? Ilmahaygu ma arday fiican baa?

Dugsiyadu waxay leeyihiin qaabab kala duwan oo waalidka loogu sheego barnaamijyada dugsiga iyo horumarka barasho ee ilmahooda. Dugsiyo badani waxay leeyihiin:

Guryo u furan wakhtiyada waalidku la kulmayo macalimiinta carruurtooda, ay eegayaan qolalkooda waxbarasho, oo dhagaysanayaana shaqada carruurtdoodu qabanayaan.

Shirarka Waalidka-Macalinka waxay dhexmaraan waalidka iyo macalimiinta. Macalinku wuxuu si gooni ah ula kulmaa waalidka ilme kasta si uu ugala hadlo horumarka iyo habdhaqanka fasalka ee ilmaha. Badanka macalimiintu waxay codsadaan ugu yaraan hal shir sannadkii dayrta. Si kastaba, haddii ilmuhu leeyahay barashooyin kale ama dhibaatooyin habdhaqan, macalin wuxuu waydiisan doonaa waalidka inay shir iskugu yimaadaan xilliyada kale sannadka. Waalidku sidoo kale ayaa codsan kara shir xilli kasta. Waalidku wuu wici karaa macalinka ama wuxuu u qori karaa qoraal macalinka uu ku codsanyo shir. Inta badan waxa la qabtaa kahor ama kadib maalinta dugsiyeedka.

Xogaha Qoran loo soo diro guriga ama carruurtu keento guriga. Tusaale, dugsiyadu waxay u diri karaan guriga xogahan:

- Jadwalka dugsiga ee kusaabsan hawlaha ardayga, hawlaha fasalka, ciidaha, ama barnaamijyada dugsiga
- Warsideyaal sheegaya waxa dhacay fasalka iyo dugsiga
- Xog-ururin waydiinaysa waalidka afkaartooda iyo tabashooyinkooda
- Foomam oggolaansho ee ardaydu si ay u aadaan aqoon korodhsi
- Ogaysiiyada kulanada, shirarka, kulanka sharfaneyaasha, xidhitaanada dugsiga, iyo dhacdoonka kale ee dugsiga
- Marmarka qaar waalidku waa inay ka jawaabaan xogo qoran. Tusaale, waa inaad saxeexdaa foom oggolaansho kahor inta carruurtaadu aanay aadin aqoon korodhsi.

Tilifoonada iyo Internetku waa qaabab kale oo dugsigu ula xidhiidho waalidka. Macalimiintu waxay inta badan isticmaalaan tilifoono si ay waalidka ula hadlaan. Marmarka qaar waxaad ku qaadan kartaa shir waalid-macalin tilifoonka. Dugsiyada qaar waxay leeyihiin khadad toos ah oo shaqo guri. Waalidku waxay wacaan lambar tilifoon oo gaar ah waxayna maqlaan farriin kusaabsan hawshii shaqada gurida carruurtiisa. Dugsiyada badankoodu waxay leeyihiin websaayd dugsi oo ay kujiraan macluumaad kusaabsan barnaamijyada dugsigu, hawlaha fasalku, iyo sida macalin iimayl loogu diro.

waaalidku way wici karaan dugsiga markasta oo ay su'aal qabaan lana hadli karaan macalimiinta ama maamulaha. Haddaad rabto inaad booqato dugsiga ilmahaaga, marka hore wac dugsiga si aad ballan u qabsato. Waxaad wici kartaa dugsiga ama aad u diri kartaa qoraal macalinka.



2. Sideen u ogaan karaa sida ilmahaygu dugsiga ku yahay?

Kaadhadhka Warbixinta: Kaadhadhka warbixintu waxay waalidka u sheegaan sida carruurtoodu dugsiga ku yihiin. Kaadhadhka warbixintu waxay taxaan xiisad kasta oo carruurtu bartaan. Maado kasta, waxa jira heer. Waalidku waxay helaan kaadhadhka warbixinta carruurtooda 4 jeer sannadkii. Carruurta ayaa badanka keena guriga kaadhadhka warbixinta. Dugsiyada qaar waxay bixiyaan kaadhadhka warbixinta shirarka Waalidka-Macalinka. Dugsiyada kale waxay ugu diraan kaadhadhka warbixinta waalidka warqad. Marka waalidku helo kaadhadhka warbixinta, waxay marmarka qaar u baahan yihiin inay saxeexaan kaadhka warbixinta ama gal-waraaqeedka. Dabadeed carruurta ayaa ku celisa dugsiga kaadhka macluumaadka.

Heerarka: Dugsiyada badankoodu waxay isticmaalaan darajooyinkan si ay ugu sheegaan waalidka sida carruurtoodu maaddo kasta:

A shaqo aad u fiican
B shaqo fiican
C shaqo dhexdhexaad ah
D shaqo hoose (shaqo liidata)
F dhacaya maadada (flunking)

A, B, C, iyo D waa darajooyin gudub. Si kastaba, ardayda dugsiga sare waa inay haystaan celcelisaan ahaan "C" dhibcaha fasalada si ay u qalin-jabiyaan. Darajada F waxay ka dhigan tahay in ilmuhu aanu gudbin maadada. Haddii ardaygu aanu gudbin maaddo, wuxuu dib u qaadan karaa maadadaa markale ama qaban karaa shaqo dheeraad ah si uu u kasbado darajo gudbid.

Macalinka ayaa go'aanasada darajada la siinayo carruurta. Macalinku wuxuu eegaa shaqada dugsiga, ta guriga, iyo imtixaano si ay uga caawiyaan go'aansiga darajada la siinayo carruurta. Macalimiintu sidoo kale waxay daawadaan oo dhagaystaan carruurta fasalka kujirta.

Warbixinta Horumarka: Dugsiyada qaar waxay bixiyaan warbixinaha hadda ama horumarka. Waalidku waxay helaan warbixinahan inta u dhaxaysa kaadhadhka warbixinta. Dugsiyada qaar, waalidka arday kastaa wuxuu helaa warbixin horumar. Warbixinahan horumar waalidka waxay u sheegaan sida carruurtoodu ku yihiin maaddo kasta. Dugsiyada kale, kaliya waalidka arday leh dhibaatooyin ayaa hela warbixin hadda ah. Warbixinahani waxay u sheegaan waalidka dhibaatooyinka ay kala kulmayaan carruurtoodu maadooyinka qaar.

3. Sideen u caawin karaa go'aan qaadashada dugsiyada?

Waalidku waxay ku caawin karaan maamuleyaasha dugsidu inay ga'aan ka qaataan barnaamijyada dugsiga. Dugsiyadu waxay ku martiqaadaan waalidka inay xaadiraan kulamada kooxda waalidka ee kala duwan. Waalidku waxay ka bixin karaan afkaar iyo talo barnaamijyada dugsiga carruurtooda marka ay yimaadaan kulamadan kooxda:

- *Waalidka Boise ee Barteyaasha Ingiriisida* waa kooxo waalid ah kuwaasoo siiyaa dugsiyada talo iyo afkaar lagu horumarinayo barnaamijyada gaarka ah sida ESL.

- *Guddida/Kooxda Horumarinta Dugsiga* waxay soo saaraan qorsheyaal loogu talogalay sida ay shaqaalaha, waalidka, iyo bulshadu ay u horumarin karto barashada ardayda.
- *Ururka Waalidka-Macalinka* wuxuu qorsheeyaa barnaamijyo si uu u taageero dugsi. Tusaale, urur waalid-macalin waxay qorshayn karaa carwo buugeed si ay buug u iibiyaan. Waxay ku isticmaali karaan lacagta ay helaan inay kombiyuutarro ugu iibiyaan fasalada.

4. Waa maxay hawlaha gaar ah een xaadiri karaa dugsiga carruurtayda?

Dugsiyadu inta badan waxay ku martiqaadaan waalidka hawlaha dugsiga ee gaarka ah. Hawlahani waxay siiyaan macalimiinta, waalidka, iyo carruurta wakhti midba ka kale ku barto.

Marmarka qaar waalidku waxay yimaadaan dugsiga si ay u daawadaan carruurtooda oo hawlo kujira sida:

- Dhacdooyinka ciyaareed si ay u arkaan carruurtooda oo ciyaaraysa isboorti sida kubadda cagta, kubadda shabaqa, ama kubadda kolayga.
- Ciyaaraha iyo bandhigyada muusigeed si ay u arkaan carruurtooda oo jilaya, heesaya, ama tumaya qalab.
- Isku-imaatinada sida qalin-jabinaha ama habeenada musarifka si ay u arkaan carruurtooda oo helaya sharaf iyo abaalmarino.
- Waalidka Boise ee dhacdooyinka Barteyaasha Ingiriisida.

Dugsiyadu waxay sidoo kale ku martiqaadaan qoysaska dugsiga si ay u ogaadaan macluumaad cusub. Qaar kamida hawlahan waa:

- *Habeenada Manhajka* si loo tusiyo waalidka waxa carruurtoodu baran doonaan sannadka. Macalinku sidoo kale wuxuu sharxi karaa waxa ay tahay ardaydu inay bartaan si ay ugu dallacaan fasalka xiga ama u qalin-jabiyaan.
- *Siminaarada Waalidka* si ay u siiyaan waalidka afkaar kusaabsan korinta carruurtooda. Waalidku waxay baran karaan sida looga caawiyo carruurta caafimaad qab iyo guul. Tusaale, siminaar wuxuu kusaabsanaan karaa sida loogu ilaaliyo carruurta dugsiga oo ayna uga bixin. Siminaarka Waalidku wuxuu sidoo kale bari karaa waalidka sida looga caawiyo carruurta barashada. Tusaale, waalidku waxay xaadiri karaan siminaar si ay u bartaan sida loogu akhriyo buugaagta carruurtooda.

- *Jihaynta Dugsiga* waa kulamo loogu talogalay waalidka iyo ardayda cusub. Jihaynta inta badan waxa loo qabtaa waalidka dugsiga barbaarinta, sannadka hore ee dugsiga dhexe ama labada fasal ee sare dugsiga dhexe iyo sannadka hore dugsiga sare. Waalidku waxay helaan macluumaad kusaabsan dugsiga cusub ee ay carruurtoodu tagi doonaan. Tusaale, waalidk waxay ogaan karaan hab-labiska dugsiga cusub. Waalidku sidoo kale waxay ka caawin karaan carruurtooda doorashada koorsooyinka.

Marmarka qaar dugsiyadu waxay leeyihiin hawlo bulsheed oo loogu talogalay waalidka iyo qoysaska bulshada carwooyinka caalamiga ah, Maalinta Qaddarinta Waalidka, iyo Maalinta Xurmada Dugsiga. Qoysasku waxay dugsiga u yimaadaan inay ku maaweeloodaan kuna raaxaystaan naftooda. Tusaale, waxay dhadhamin karaan cuntooyinka kala duwan ee waddamo badan carwada caalamiga ah.

5. Waa maxay qaababka qaar aan iskaa wax kaga qaban karo dugsiyada carruurtayda?

Marmarka qaar dugsigu wuxuu caawimo uga baahan yahay hawlaha dugsiga. Dugsiyadu waxay waydiistaan waalidka inay iskaa wax ugu qabtaan hawlo kala duwan.

Fasalada iyo Hawlaha Barasho ee aad iskaa wax ugu qaban karto waa **in**aad:

- fasal ugala hadasho shaqadaada ama waddankaaga
- ugu raacdo aqoon korodhsiga fasalo
- wax ugu akhrido fasal ama u dhagaysato arday wax akhriyeysa

barnaamijyada Dugsiga waxaad iskaa wax ugu qaban kartaa waa inaad:

- caawiso qoob-kaciyaar dugsi
- keento sharaab iyo cunto fudud kulanka waalidka
- qorshayso lacag ururin
- caawiso tarjumid
- caawiso hawlaha Barteyaasha Ingiriisida ee Waalidka Boise

Waxaad haysataa qaabab badan si aad uga qaybqaadato dugsiyada. Dugsiyadu waxay u baahan yihiin caawimadaada, afkaartaada, iyo kaqaybqaadashadaada waxbarashada carruurtaada. Waxaad tahay qayb muhiima oo waxbarashada kamida. Markasta waa lagugu soo dhawaynayaa dugsiyada.

6. Maxaan guriga ka qaban karaa si aan u caawiyo barashada carruurtayda?

Ardayda guulaysataa waxay dugsiga yimaadaan iyagoo diyaar u inay waxbartaan oo leh caadooyin barasho oo adag. Waxa jira qaabab badan oo waalidku ku caawin karo carruurtoodu inay dugsiga ku wanaagsanaadaan. Waad caawin kartaa xiitaa hadaad ku hadasho Ingiriisi aad u yar. Ma aha khasab inaad taqaan Ingiriisida si aad u caawiso. Halkan waxa ah waxyaabo muhiim ah si aad u caawiso barashada carruurtaada:

Labiska Cimilada: Hubso in dharka carruurtaadu sax ku yihiin cimilada debadda. Tusaale, hadday debaddu tahay qabaw, waa inay xidhaan dhar diiran sida koodhan, koofiyado iyo gacmo-gashi.

Balcadda Dugsiga iyo Qaababka Dharka: Dugsiyada qaar ardaydu waa inay dugsiga u xidhaan balcad. Tusaale, balcad waxay noqon kartaa shaadh cad iyo surwaal gaaban ama haaf oo buluug ah. Dugsiyada kale ma laha balcad dugsiyeed, laakiin waxay leeyihiin qaabab dhareed. Qaababka labisku waa xeerar gaar ah oo kusaabsan dharka carruurtu ku iman karto dugsiga. Tusaale, dugsiyada qaar innamadu ma xidhan karaan koofiyado hablaha looma oggola inay xidhaan masar. Haddii carruurtaada aan dugsiga si sax ah loogu labbisin, dugsiyada qaar dib ayey guriga ugu soo celin.

Alaabada Dugsiga: Caruurtu waxay u baahan yihiin inay keenaan alaabada dugsiga fasalka. Alaabada dugsigu waa warqad, qalin-qori, qalin-biiro, iyo masaxaado. Marmarka qaar carruurtu waxay u baahan tahay alaabo kale sida mastarado, maqas, ama xabag. Badanka macalimiintu waxay siin doonaan ardayda liiska qalabka dugsiga ay u baahan yihiin. Haddaanad awoodin inaad iibiso qalabka, macalinka u sheeg.

Kahadlidda Shaqada Dugsiga: Waalidku waa inay waydiiyaan carruurtooda maalin kasta, "Siduu ahaa dugsigu maanta?" "Ma leedahay shaqo guri caawa?" dugsiyadu waxay kaa rabaan inaad kala hadasho carruurtaada shaqo dugsiga. Waad waydiin kartaa carruurtaada waxay ku baranayaan fasaladooda. Waxaad sidoo kale waydiin kartaa carruurtaada inay keenaan guriga oo ay ku tusaan waraaqahooga darajada.

TUSMOOYIN FAA'IDO LEH

Dugsiyadu ku waxay liistayn karaan fursadaha iskaanimo warbixinaha dugsiga, websaaydka dugsiga, ama ogaysiis gaar ah oo guriga dugsigu u diray.

Ka Caawinta Shaqo Guriga: Shaqo guridu waa hawl arday oo macalimiintu siiyaan ardayda si ay ugu soo qabtaan guriga.

Waxa jira noocyo kala duwan oo hawlo shaqo guri ah. Carruurtu wax dhici karta:

- inay dhammeeyaan hawlihii dugsiga kasoo bilaabmay
- inay qabtaan hawlaha barbaraya ama ay dib u eegaan wax ay kusoo barteen dugsiga (sida akhrinta ama xisaabta)
- inay qabtaan mashaariic gaar ah, sida warbixinada buugga, tijaabooyinka sayniska ama sawiridda khariiraddo
- inay bartaan kadis ama imtixaan

macalinkaa go'aanasada inta shaqo guri ee la siinayo habeen kasta. Macalimiinta oo dhami siiyaan in isku mida oo shaqo guri ah. Carruurta waaweyni inta badan waxay leeyihiin shaqo guri kabadan ta carruurta yaryar. Halkan waxa ah waxyaabo aad qaban kato si aad uga caawiso carruurtaada shaqo guridooda:

Wakhtiga Shaqo Gurida: Carruurtu waxay leeyihiin hawlo maalmeed badan sida kuwo joogto ah, ballamo, wakhti ciyaareed, barnaamijyada dugsiga kadib, iyo shaqo guri. Waxaad ka caawin kartaa carruurtaadu inay u samaystaan wakhti gaar ah shaqo gurida. Aad ayey u fiican tahay haddii shaqo gurida la qabto wakhti isku casar ama fiid kasta, laakiin maya xilli dambe oo fiidkii ah, Xilliga shaqo gurida, waa inaad bakhtiisaa tilifishan iyo fiidyawga/ciyaaraha kombiyuutarka. Carruurtu waxay u baahan yihiin meel deggen oo ay ku qabadaan shaqo gurigooda.

Fiirinta Shaqo Gurida: Waad eegi kartaa shaqo gurida si aad u aragto hadday qurxoon tahay oo dhammaytiran tahay. Carruurtaadu way kuu sharxi karaan shaqo gurigooda. Marmarka qaar carruurtu waxay arkaan khaladaad marka ay sharxayaan shaqo gurigooda.

Dhibaatooyinka Shaqo Gurida: Marmarka qaar carruurtu ma dhammayn karaan shaqo gurigooda waayo ma fahamsana. Haddii waalidku fahmayo shaqo gurida way caawin karaan carruurtooda, laakiin waalidku waa inaanu waligii uga shaqayn carruutooda shaqo gurigooda.

Waalid badani waxay dareensan yihiin inay karayn inay ka caawiyaan carruurtooda shaqo gurifa. Marmarka qaar waalidku ma fahmayo Ingiriisi badan ama ma fahmayo maadada. Haddii waalidku aanu ka caawin karin carruurta shaqo gurida, waa inay qoraal u qoraan ama wacaal macalinka ilmaha. Waalidku wuxuu u sheegi karaa macalinka in ilmihiisu uu ku dhibaatooday dhammaystirka hawsha.

Marmarka qaar carruurtu waxay heli karaan caawimo dheeraad ah hawsha shaqo guridooda inta dugsiga , kadib dugsiga, ama nusasaacaha.

Marmarka qaar carruurtu ma rabaan inay qabtaan shaqo gurigooda. Waxay heli karaan wakhti ay ku daawadaan TV-ga ama ciyaaraan laakiin, waligood ma heli karaan wakhti ay ku qabtaan shaqo gurigooda. Inta badan macalimiintu waxay wici doonaan ama qoraal u qori doonaan waalidka haddii ilmuhu aanu qabanayn shaqo gurida. Macalimiinta iyo waalidku waa inay go'aansadaan waxa ku dhici doona carruurta aan shaqo gurigooda qaban. Macalimiintu badanka waxay siiyaan ardayda darajo hoose.

maktabada: Hawlaha shaqo gurida qaarkood carruurtu waxay uga baahan karaan alaab maktabada dadwaynaha. Alaabada maktabada oo dhan waxa lagu isticmaali karaa maktabada dhexdeeda. Haddii Imahaagu rabo inuu alaab guriga u soo qaato ama isticmaalo kombiyuutarada maktabada, waa inaad leedahaHaddii Imahaagu rabo inuu alaab guriga u soo qaato ama isticmaalo kombiyuutarada maktabada, waa inaad leedahay kaadhka maktabada. Waxaad ka heli kartaa kaadhka maktabada maktabada. Qaado qaansheeg ama document kale kaasoo muujinaya caddaynta ciwaankaaga.

Wada Akhrinta iyo Wada Sheekaysiga: Carruurta guriga wax ku akhridaa dugsiga way ku fiican yihiin. Waa fikrad fiican inaad ku yeelataan guriga wakhti qoysku wax akhriyo. Xilliga wax akhrinta waxaad u akhriyi kartaa carruurtaada, carruurtaadu way kuu akhriyi karaan, ama qofkastaaba wuu iska akhrisan karaa wakhtiga akhriska. Waa u muhiim carruurtaadu inay ku arkaan adoo Ingiriisi ama luuqaddaada wax ku akhriyaya.

Haddii akhrintu kugu adag tahay, carruurtaada u sheekee. Waxaad uga sheekayn kartaa sheekayoon kusaabsan qoyskiina markaad yarayd iyo carruurtaadu markay yaryaraayeen. Carruurtaadu sidoo kale way kuu sheekayn karaan. Waxaad ku sheekayn kartaa Ingiriisi ama luuqaddiina.

Hawlaha Barashad Qoyska iyo Xarumaha Khayraadka Qoyska: Dugsiyo iyo ururo bulsheed oo badani waxay bixiyaan barnaamijyo barashada qoyska ah fiidkii iyo dhammaadka toddobaadka. Waalidka iyo carruurtu way yimaadan hawlahan qoyska. Qoyskaagu waxay baran karaan maadooyinka sida xisaabta, sayniska, akhrinta, iyo kombiyuutarada. Waxaad badanka heli doontaa alaabo aad guriga ugu qaadato barasho badan.

Dugsiyada qaar waxay leeyihiin xarumaha khayraadka qoyska. Xarumahani waxay leeyihiin alaab uu waalidku amaahan karo oo guriga u qaadan karo. Alaabada qaar waxay kusaabsan yihiin koboca ilmaha, nafaqada, badbaadada, caafimaadka, dugsiga, iyo hawlaha barasho. Waxa jira badanka buugaag, ciyaaro, fiidyawyo, rekoodho, iyo cajado cod.



TUSMOOYIN FAA'IDO LEH

La xidhiidh dugsiga ilmahaaga si aad u ogaato hadday u hayaan xarun kaalmada qoyska ama hawlo barasho ee qoyska.

7. Maxaan samayn karaa si aan u caawiyo carruurtaydu inay qorsheeyaan noloshooda kadib dugsiga sare?

waalidku waa inay wax ka ogaadaan shaqaalaha dugsiga ee caawin kara qorshyaasha mustaqbalka carruurtooda. Tilmaamaha la-taliyaha dugsiga sare ama la-taliyaha xirfadeed wuxuu caawin karaa qoysasku inay go'aan ka qaataan waxa ardaydu ay qabtaan dugsiga sare kadib. Marka ilmahaagu bilaabo dugsiga sare, bilaw inaad kala hadasho qorsheyaasha mustaqbalka. Waxa aad u fiican inaad go'aan qaadato kahor sannadka u dambeeya ee dugsiga sare. Hadday carruurtu go'aansadaan xilli dambe inay kolajka aadaan, waxa dhici karta inayna helin koorsooyinka ay u baahnaayeen oo dhan. Ardaydu waa inay qaataan koorsooyinka qaar dugsiga sare si ay ugu diyaargaroobaan kolaj. Ardaydu sidoo kale waa inay galaan imtixaano dugsiga si ay u codsadaan kolajka.

IX. WAXBARASHADA DADKA WAAWEYN

1. Halkeen tagi karaa si aan Ingriisi u barto ama aan u qaato xiisado kale?

Waxa jira fursado badan oo waxbarasho oo dadka waaweyn ah. Xiisado badan ayaa bilaash ah, laakiin qaar baa lacag la bixiyaa. Xiisadaha waxa la bixinayaa maalinta iyo fiidkii. Xiisadaha dadka waawayn waxa lagu qabtaa kolajka bulshada, dugsiyada, maktabadaha, iyo xarumaha bulshada

Qaar xiisadaha waxbarasho ee dadka waaywayn waa:

- **Ingriisi oo Luuqada Labaad ah (ESL)** – xirfadaha luuqada Igiriisiga oo aasaas ah.
- **GED iyo Xirfadaha Aasaasiga ah** – akhriska aasaasiga ah iyo xirifadaha xisaabta, iyo si loo diyaargaroobo imtixaanka GED (dhamaystirka iskuulka sare)

Waxa jira sidoo kale barnamijyo tacliineed kolajka iyo jaamacadaha sida Gobolka Boise. Barnaamijyada tacliineed waxay u diyaariyaan dadka waaywayn waxbarasho kolaj waxayna qaadaan lacag .



Macluumaad intaa dheer ka eeg internetka Waxbarashada Aasaasiga Dadkawaaweyn Idaho – Machadka Qaranka ee Qorista/Akhriska : http://www.nwlincs.org/idalincs/

TUSMOOYIN FAA'IDO LEH

Waxaad ka heli kartaa macluumaad kusahabsan xiisadaha waxbarsho ee dadka waawayn:

- **iskuulka ilmahaaga**
- **Laabka barashada**
- **Maktabada dadwaynaha**
- **Jaamacada Gobol Boise**
- **Ururo diimeedyada ama qabiilada**
- **Kolajka Galbeedka Idaho**

Degmo Dugsiyeedka Boise

KU SOO DHAWAW DUGSIGA BOISE KATIMID MAAMULAHAYAGA GUUD

Dr. Don Coberly

Degmo Dugsiyeedka Madaxabannaan ee Magaalada Boise

Gacaliye Waalid iyo Wakiil :

Ku soo dhawaada Degmo Dugsiyeedka Boise! Waanu ku faraxsanahay in aan qaabilo adiga iyo ardaydaada idinkoo qaybka ah bulshadeena. Waanu qiimaynaa arday kasta oo ka shaqaynaa in aanu waynayno xooganaanta shakhsiyeed anagoo kor uqaadayna meelaha liita . Boise wuxuu leeyahay barnaamijyo farabadan oo la heli karo si aan u xoojino ama u karaarino waayo-aragnimada waxbarasho ee ardaygaaga markay u diyaar garoobayaan kolaj ama xirfad. Aqoonyahano khibrad sare leh ayaa hogaamiya barnaamijyadan.

Waan ku faraxsanahay in aad ku qaabilo qoyskaaga idinkii qayb kamid ah Degmadeena . Haddii aad hayso su'aalo ama u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, fadlan la xidhiidh dugsiga deegaankaaga (waxay bixin karaan turjumaad haday lagama maarmaan tahay). Ka soo qaybgalkaaga Dugsiyada Boise waxay muhiim u tahay guusha ardaydaada iyo Degmadeena.

Sincerely,

Don Coberly

Dr. Don Coberly
Kormeeraha

Wax u Baridda Maanta Mustaqbal Wanaagsan…

1. Sideen ilmahayga u qori karaa?

haddii ay jirto luuqad kale gurigaaga, waa in aad wacdaa marka hore Diane, oo ah *Khabiirka* Qaadashada ee ELL-ka Boise. Khabiirada waxa laga heli karaa 472-3097 inta u dhaxaysa 7:00 galinka hore. iyo 2:30 galinka dambe. Waxay kaa caawin doonaan dhammaan waraaqaha shaqada oo ku bari doonaan dugsiga, maamulaha iyo macalinka.



2. Waa maxay dugsiga ilmahaygu tagi doonaa?

Ilmaha **heerka hoose ah** (fasalada K – 6^{aad}) waxa loo qoondaynayaa dugsi ELL hadduu u baahdo kaalmo luuqadeed. Ardayda inta badan waxa lagu daraa ciyaal ay isku da' yihiin.

Ardayda **heerka sare ah** (fasalada 7^{aad} – 12^{aad})waxay tagi doonaan barnaamijka Borah ama Hillside Bridge **ama** fasalada sare ee dugsiga dhexe (fasalda 7^{aad} – 9^{aad}) ama dugsiga sare (fasalada 10^{aad} – 12^{aad}) ee u dhaw.

3. Waa maxaa barnaamijada Boise u haysaa ardayda fasalada sare ee dugsiga dhexe iyo dugsiyada sare?

Barnaamijka **Bridge** (ardayda U.S ee kayar 2 sano) macalimiinta ELL ayaa bara Ingiriisi, Xisaab, Saynis, iyo xiisado kale.

Fasalada Sare ee Dugsiga Dhexe/Dugsiga Sare ee Dhaw (Ardayda ku hadasha Ingiisida Heerka Dhexe/Sare) Macalimiin khabiiro ah ayaa bara xiisado badan oo ay ka mid yihiin Ingiriisi, Xisaab, Saynis iyo Taariikh. Macalimiin khaas ah ayaa ka caawiya tilmaamaha fasalka iyo shaqada guriga .

4. Sidee buu ilmaygu dugsiga u tagi doonaa?

Diane Goicoechea-Price ayaa ka caawin doona ardayda ELL jadwalka baska qaadaya. Wac 472-3097.

Waxay qaadanaysaa **shan** (5) maalmo shaqeed kahor inta uu basku ilmahaaga qaadi doono. Ilmahaagu bas heli maayo hadii aad ku nooshahay meel dugsiga u jirta 1 ½ mayl (2.4 kilometers) ama kayar .

Qoraalo Dheeraad ah

5. Maxaan lacag bixin doonaa dugsiga?

- Ardaydu waxay ka iibsan karaan qureecda ama qadada dugsiga. Waxay u qalmi karaan qado jaban ama bilaash. (eeg qiimayaasha boiseschools.org)
- Ardayda qaadanaya P.E. ee fasal sare ee dugsiga dhexe ama dugsiga sare waa in bixiyaan $5 sanduuqa dharka.
- Waxa jira lacag la qaado farshaxanka, sawiraanta iyo xiisadaha kale ee sidan oo kale ah.

Liiska Cuntada Dugsiga Hoose

Qureec

Doorashooyin

Firilay kala duwan
Roodhi la kululeeyey
Caano
Dheecaan Liin-macaan

Dhamaan qureecaha bilaashka ah waxa kujira dheecaan iyo caanaha.

Qadada

Doorashooyin

Waxaanu bixinaa 3 ikhtiyaar oo cunto maalin kasta, oo ay la socdaan caano kala duwan . caruurtu waxay awoodi doonaan in ay doortaan midho, khudrado kala duwan ,iyo roodhi oo ka timid Maqaaxidayada Doorashada Caafimaadka leh si ay ugu weheliyaan cuntadooda.

Ardayda dugsiga barbaarintu waxay ka cuni karaan qureecda iyo/ama qadada dugsiga kahor ama kadib xiisadooda.

Liiska Cuntooyinka Dugsiga Sare

Qureecda

Doorashooyin

Cajiin Wareegsan
Roodhi yar oo wareegsan
Laxooxda qureecda
Caano-fadhi
Firiley Qabow oo Kala Nooc
Nooc ah

Dhamaan qureecda waxa kamid ah dheecaan iyo doorashadaada caano yar ama badan. Dugsiyada qaar waxay leeyihiin nusasaace barqada. Qureec waa la helaa.

Qadada

Doorashooyin Sareeya

Waxa kamid noqon kara :

Hamburger
Loxoox
Pizza kala duwan
Tacos
Chicken Nuggets
Qabaw & Kulul
Saanwij

Maqaaxi Isku Adeegga

Waxa kamid noqon kara:

Baastada Alfredo
Hilibka Digaaga Miyiga
sabaayad hilib leh
Baasto Dhaadheer Eeshiyaan ah
Hilib digaag macaan & Dhanaan

Xulashooyin Sare

Macaga Caanka ah ee Pizza
Saanwijyada Deli oo la dalbo

Hel buskudka wadanka lagu sameeyay adoo isticmaalaya kaadhkaaga cuntada!
Dhamaan qadoonyinka waxa kujira, midho daray ah, khudrad, & caano .
Khudrad & waxyaalo duxda kujirtaa ay yartahay ayaa la helaa maalin kasta, fadlan waydii.

6. Illmahaygu dib ma uga dhici karaa ama ka maqnaan karaa dugsiga?

Daahid (dib uga dhicid dugsiga): Arday wuu daahay hadii aanu joogin qolkii la geeyey marka jalasku dhacay. haddii ardaygu dib uga dhaco xiisada in ka badan labaatan (20) daqiiqo, waxa loo tixgalin doonaa maqnaansho. Ardaydu dib ayey u dhici karaa (daahi) lix jeer xiisad kasta simistar kasta. Daahida lixaad (6^{aad}) ardaygaagu waa inuu soo xaadiraa dugsiga Sabtida. Arday waa in uu ku noqdaa fasalka haddii uu ka maqnaado in kabadan lix jeer.

Maqnaashaha Cudurdaarka leh: Arday wuu maqnaan karaa sagaal (9) cisho simistar kasta xiisad kasta. Waalidku ama ilaaliyuhu waa in uu la soo xidhiidhaa dugsiga 48 saacadood gudahood si uu uga cudurdaaro (sharaxo) maqnaanshaha. Hadii maqnaanshuhu uu fasax leeyhay oo ay waalidkuna la soo xidhiidheen dugsiga, ardaygu wuu soo dhiibi karaa shaqo guri ama hawl kasta. Hadii ardaygu maqnaado in kabadan sagaal (9) cisho waa in ay dhamaystiraan "codsi" (codsi qoran si uu u helo dhibco xiisadda).

Maqnaansho/Jaritaan aan Cudurdaar Lahayn: haddii ardaygu maqnaado, ama ka tago dugsiga, iyada oo aanu waalidku la soo xidhiidhin xafiiska waa bilaa cudurdaar ama jarid. Haddii uu galo in kabadan sagaal (9) maqnaansho simistar kasta, wuxu waayi karaa dhibco. Loo ogalaan maayo inuu dhamaystiro wax hawlo arday ah xiligaa uu maqnaa. Waxay saamayn kartaa nidaamka cadsiga. Ardaydana waa laga joojin karaa ama la eryi .

7. Ardaygaygu ma ka tagi karaa dugsiga maalintii?

Waalid wuu la soo xidhiidhi karaa dugsiga si loo siiyo fasax ilmahooga si uu uga tago dugsiga maalintii. Ardaygu waa inuu soo maraa xafiiska kahor ka tagida dugsiga maalin dugsiyeedka. Iska tagid bilaa fasax ama tagid la'aan xafiiska waxay sababi doontaa Gudbin Anshax. Ardaydu waa in ayna joogin goobta baabuurta la dhigo wakhtiga qadada ama qureecda.

8. Maxaa ka mamnuuca dugsiga?

Yabaal, moobil, qalimaan liisar ah, qaraxdo, qoryaha dhiiqa, silsilado laga lulo dhexda waa la mamnuucay.

Qarinta madaxa (marka laga reebo sobobo diineed) loo ma ogala dugsiga.

Daroogada, khamrada iyo buuriga (sigaarka) sidoo kale waa mamnuuc. Ardayda iskuulka waa laga joojin ama laga eryi dugsiga. Ardayga waxa loo gudbin doonaa bileyska.

Tixraac kasta ama tageere budhcad waa la mamnuucay. Maya calaamado cadho keeni kara oo la dareemi karo ama la muujiyo taasoo dhibaataynaysa kood diimeed ama dhaqaneed kale. Ardayda waa laga joojin karaa ama laga eryi karaa dugsiga.

Caayid ama ku gafid lama ogola. Hanjabaado qoran ama hadal ah looma dul qaadan doona. Dagaal lama ogola. Ardayda waa laga eryi degmo dugsiyeedka hajabaada awgeed. Ardayga waxa loo gudbin karaa bileyska.

9. Maxaa ku dhici doona ardayga dugsiga keena hub?

Ardayga leh hub (qori, midida jeebka, ul, iwm.) waa laga eryi doonaa degmo dugsiyeedka. Ardayga waxa loo gudbin doonaa bileyska.

10. Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan Degmo Dugsiyeedka Boise?

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo kusaabsan degmo dugsiyeedka websaaydkayaga: http://www.boiseschools.org/ ama adoo wacaya 854-4000.



11. halkeen ka heli karaa macluumaad kusaabsan Barnaamijyada Bartaha Luuqada Ingiriisiga?

Macluumaad ELL oo dheeraada booqo websaaydkayaga:
http://www.boiseschools.org/ell/index.html

Waxa kalood la soo xidhiidhi kartaa mid kasta oo dadkan soo socda ah:

Diane Goicoechea-Price
Khabiir Qaadasho
472-3097
diane.goicoecheaprice@boiseschools.org

Jolene Lincoln
La-taliyaha Barnaamiyada Dawladda Dhexe
854-4379
jolene.lincoln@boiseschools.org

Stacey Roth
Maclin La-taliye ah ee ELL
854-4379
stacey.roth@boieschools.org

Molly Jo de Fuentealba
Lataliye Barnaamijyada Dawlada dhexe
854-4379
molly.fuentealba@boiseschools.org

Cindy Daly
La-taliye Barnaamijyada Dawlada Dhexe
472-3593
cindy.daly@boiseschools.org

Dr. Ann Farris
Maamule Barnaamijyada Dawlada Dhexe
854-4133
ann.farris@boiseschools.org

Qoraalo Dheeraad ah